



Naga Caawi Sidii aanu u Abuuri lahayn Dugsiga Sare ee Farsamada ee Madison oo La Casriyeeyay

Raadinta Ka qayb qaadashada Bulshada

Ka dib xeerkaa maalgelinta daymeed ee 2017-ka, PPS waxay hore u sii wadaa qorshaynta iyo naqshadeynta loogu talagalay casriyeynta Dugsiga Sare ee Farsamada ee Madison. Qorshaha weyn waxaa ka mid ah dib u cusboonaysiin weyn oo lagu sameeyay dhismayaasha taariikh ahaan muhiimada leh iyo waxyaabo cusub oo dheeraad ah oo loogu talagalay dhismaha dugsiga. PPS waxay raadinaysaa talooyinka dadweynaha oo ku saabsan ah dib u naqshadeynta Dugsiga Sare ee Farsamada ee Benson waxayna raadinaysaa tabarucayaal ku soo biira Kooxda Tala bixinta Naqshada (DAG) ee Dugsiga Farsamada ee Benson.

Ku soo biir Kooxda Tala bixinta Naqshada (DAG) ee Dugsiga Farsamada ee Benson

Kooxda Tala bixinta Naqshada (DAG) ee Dugsiga Farsamada ee Benson waxaa ka mid ah waalidiinta, macallimiinta, ardayda, qalin jabiyayaasha, hawl wadaagayaal iyo wakiilada bulshada kuwaasi oo ku lug yeelan doona dejinta naqshadeynta Dugsiga Sare ee Farsamada ee Madison ee la casriyeeyay. Kooxda waxaa ka mid noqon doona xubno matalaya ardayda, macallimiinta, qalin jabiyayaasha, xirfadlayaasha dhanka ganacsiga, waalidiinta, barnaamijyada dugsiga, goobta suurtagalka ah iyo/ama hawl wadaagayaasha lacageed, maamulka dugsiga iyo wakiilada guddiga dugsiga. Kooxdu waxay kulmi doonaan wakhtiyada galabtii ee Khamiista, qiyaastii lix wakhti inta lagu jiro sanad dugsiyeedka 2018/2019



Hawsha Kooxda La Talinta Naqshada

Ujeedada DAG waa horumarinta qorshaha dhismaha dugsiga sare oo dhammaystiran, sinnaansha leh, isku dhafan isla markaana aragti leh oo la kaashanayo ka qayb qaadashada bulshada dugsiga ee dhabta ah. Xubnaha waxaa laga fili doonaa in ay shaqeeyaan qiyaastii hal sano inta lagu jiro wejiyada qorshaynta iyo qaabeynta naqshada.

Faahfaahinta Mashruuca Dugsiga Farsamada ee Benson

Dhismaha waxaa la qorsheeyay in uu bilaabmo 2021. Ardaydu waxay ku sii jiri doonaan dhismaha inta uu dhismuhu socdo kaasi oo qaadanaya saddex weji oo isku xiga, kaasi oo uu mid kasta muddadiisu tahay hal sano.

Ka qayb qaado isla markaana La soco Waxa jira

Si aad ugu biirto Kooxda Tala bixinta Naqshada ee Dugsiga Farsamada ee Benson, isticmaal codsiga internet-ka ee halkan: BensonBond.pps.net. Haddii aadan awoodin in aad ku biirto DAG, waxaad weli fursad u heli doontaa in aad ka qayb qaadato Kulanka Nashqadeynta Dadweynaha ee Dugsiga Farsamada ee Benson ama ka soo qayb gal Goobta Dadka U Furan ee 2019-ka. Wixii macluumaad dheeraad ah iyo macluumaadkii u dambeeyay booqo website-ka mashruuca: BensonBond.pps.net. Ku soo biir liiska boostada ee mashruuca Dugsiga Farsamada ee BHSMod@pps.net.



BARNAAMIJKA MAALGELINTA DAYMEED EE DUGSIYADA DADWEYNAHA PORTLAND

<http://BensonBond.pps.net> • 503-916-2222 • www.facebook.com/pps.homepage • [@PPSConnect](https://twitter.com/PPSConnect)

Dugsiyada Dadweynaha Portland waa kuwo taageera dadka laga tirada badan yahay iyo shaqo bixiye loo wada siman yahay.